

Imaanshaha balantaada ee fiidiyow ahaan

Wicitaanka fiidiyowgu waa mid sahlan oo si fudud loo isticmaali karo

Halkii aad ugu safri lahayd ballantaada, waxaad geli doontaa aagga sugitaanka ee khadka tooska ah, adoo adeegsanaya xiriirka hoose.

Adeeggu wuxuu arki doonaa inaad timid, iyo adeeg bixiye ayaa ku soo biiri doona wicitaankaaga markii diyaar tahay.

Uma baahantid inaad xisaab ama akoon samaysatid.

Wicitaanka fidiyowga waa kuwo badbaadsan asturnaantaada shakhsi ahaan waa la ilaaliyey.



Sidee ayaan isku xaadiriya balanteyda fidiyowga?

Aad:

Maxaan ubaahanahay inaan sameeyo wicitaan fiidiyoow ah?



Qalab aad ku sameeyso wicitaan fidiyow, sida telefoonada smartphone, tablet, ama kombuyutar oo leh webcam iyo codbixiye (speaker) (badanaa labtobyada way ku samaysan yihiin).



Khad internet oo la isku halayn karo (wired, WiFi, ama mobile data). Haddii aad ka daawan karto fiidiyow khadka tooska ah (onleenka), waa inaad awoodaa inaad sameeyso wicitaan fiidiyoow ah.



Meel iftiin leh ee khaas ah ee wadatashiga, meel aan lagaa qasaynin.



Isticmaal nooca ugu dambeeya ee **Edge**, **Safari**, ama **Chrome** waxqabadka wacitaanka fiidiyowga ugu fiican.



Microsoft Edge
Windows



Apple Safari
iOS, iPadOS,
macOS



Google Chrome
Android,
Windows, macOS

Maxaan u baahanahay inaan ogaado?

Ma ammaan baa oo sir baa?

Qolalka fiidiyowgu waa kuwo gaar ah. Keliya bixiye idman ayaa qolka geli kara ama dadka gelin kara wicitaan kooxeed.

Lama kaydio wax macluumaad markaad gasho.

Waa imisa qiimaha wicitaanka fiidiyowgu?

Wicitaanka fiidiyowgu waa lacag la'aan marka laga reebo isticmaalkaaga internetka.

Talo! Haddii aad awoodo, ku xir shabakad Wi-Fi ah si aad uga fogaato adeegsiga (data) xogtaada moobiilka.

Intee in le'eg xogta (data) internetka ayaan isticmaali doonaa?

Wicitaanku markuu xirmo ka dib, waxay isticmaashaa qadar xog ah oo la mid ah Zoom ama FaceTime.

Sideen u sameeyaa wicitaankeyga fiidiyowga?

1. Fur baraawsarkaaga oo ku qor cinwaanka adeegga ee cinwaanka barta cinwaanka (ma aha sanduuqa raadinta).

2. Si aad u bilowdo wacitaankaaga, midkood:

- dhagsii **Enter Waiting Area**

Enter Waiting Area

- ama guji badhanka **Start video call** oo dooro goobta sugitaanka.

Start video call >


3. Haddii lagu weydiisto, u fasax barowsarka inay isticmaasho kaameraada iyo microphone.

4. Raac tilmaamaha shaashadda si aad u bilowdo wicitaanka fiidyaha.

5. Dhamaadka wicitaanta, riix **Leave**.



Talooyin!



Ku hagaaji taleefankaaga casriga ah geeskiisa dheer.



Wicitaanada kooxeed, fadlan makarafoonkaaga aamusi hadaan hadlin mooyee.



Isticmaal badhanka gacan-kor u qaadista si aad u fiirsato.

Maxaan sameeyaa haddii wax khalad dhacaan?

Booqo <https://england.nhs.attendanywhere.com/troubleshooting>

Warbixin dheeraad